Raacidda Muslimiintu waa waajib

Waxaa dhigay

Dr. Xasanweli Sheekh Xuseen Cismaan, DVM

Al Imaamu Al Sh-shaaficii

Al Imaamu Al Nawawii oo hadalkiisa sii watana wuxuu yiri: "Al Bayhaqii wuxuu isnaadkiisa ku wariyay kitaabkiisa Manaaqibu Al Sh-shaaficii inuu Imaam Al Sh-shaaficii, Allaha raalli ka noqdee, yiri: "Umuurta cusubi waa laba nooc, oo midkood waa wax cusub oo la bilaabay, khilaafsanna Kitaabka iyo Sunnada, ama atharka, ama ijmaac. Taasi waa bidcada wax baadiyeysa. Tan labaad waa wax la bilaabay oo khayr ah, uusan mid culummada ka mid ahna khilaafin. Tani waa wax cusub oo aan xumaan lahayn, ayadoo uu Cumar, Allaha raalli ka noqdee, salaadda Taraawiixda ee bisha Ramadaan ka yiri: "Tani waa bidco nicmo leh", oo macneheedu yahay: "waa wax cusub oo aan hore u ahaan jirin, hadday ahaatayna uusan dhexdeeda ku sugnayn reebid wixii tegey". Sidaas ayuu ku egyahay warka Al Sh-shaaficii.

Al Ijmaacu: waxay musliminta badankoodu isku raacaan

Imaam Al Sh-shaaficii wuxuu kitaabkiisa Al Risaalah ku yiri:
"Al Sh-shaaficii wuxuu yiri qof wax yiraahdaa wuxuu igu yiri: Math-habkaaga waan gartay inta ku saabsan Axkaamta Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo in qofka u hoggansama awaamirta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu Ilaahay u hoggaansamay ayadoo uu Ilaahay u hoggaansanaanta Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, fardi ka yeelay. Xujaduna waxay ku istaagtay waxaad tiri, oo ah inayan xalaal u ahayn qof muslin ah oo cilmi u yeeshay Kitaabka iyo Sunnada inuu yiraahdo wax midkood khilaafsan, waxaanna ogaaday inay taasi tahay wuxuu Ilaahay fardi ka yeelay. Laakiin maxay tahay xujjadaadu in loo hoggaansamo waxay dadku isku raacaan, uusanna ka oollin nas xukunka Ilaahay, aanna Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga warin? Ma waxaad leedahay in waxa uu ghayrkaa leeyahay inuusan ebedkiis ijmaac noqoneyn inuu ku fadhiyo Sunno sugantay, in kastoo ayan warin, mooye?" Wuxuu yiri: waxaan ku iri: "Midda ku saabsan waxay isugu yimaadaan oo ay isku raacaan, oo ay dusheeda isugu yimaadaan ayna sheegaan inay tahay wax laga wariyay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxay ahaaneysa siday yiraahdeen, Inshaa'a Allaahu. Wixiise ay isku raacaan oo ayan (Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) ka warin waxay ixtimaaleysaa inay yiraahdeen ayagoo ka warinayaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siday u ixtimaaleyso ghayrkeed, markaasoo ayan noo bannaaneyn inaan u qaadanno wax la wariyay maxaa yeelay ma ay bannaana in la wariyo wax laga maqlay Salla Allaahu Calayhi Wasallam mooyee, mana ay bannaana in la wariyo wax la iska maleeyey, oo ay dhici karto in loo maleeyo si ka duwan sida uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri. Sidaas ayan u raaci jirnay waxay yiraahdaan (waa badanka culummada), annago ayaga raaceynna, annagoona ogsoon in (waxaas lagu raacayo) hadday tahay Sunnooyinka Rasuulka llaahay,Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayan intooda badan ka dahsooneyn oo ayan ka qarsooneyn, ayagoo Sunnooyinku ka dahsoonaan kara qaarkood. Waxaan kaloo ogsoonnahay inay caammada muslimiintu ayan isku raaceyn oo ayan isku waafaqayn in la khilaafo Sunnada Rasuulka, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayanna. isku raacayn gaf iyo dambi, Inshaa'a Allaahu. Hadduu qofkii waxa oranayay yiraahdo: "Ma haysaa wax daliil u ah oo aad ku xoojisid waxaan aad leedahay?" Markaas waxaan leeyahay: "Waxaa noo

warramay Sufyaanu oo ka wariyay Cabdu Al Malik bin Cumayrin oo ka wariyay Cabdu Al Raxmaani bin Cabdu Allaahi bin Mascuudin oo aabihiis ka wariyay oo yiri inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam, yiri:
"Naddara (waa daad dibic kor ku leh oo saadka ku xigah) **Allaahu Cabdan.",** oo macihiisu yahay: "Ilaahay ha u nicmeeyo oo wajigiisa nuuriyo". Sufyaan wuxuu nooga wariyay Cabdu Allaahi bin abii Labiidin oo ka wariyay ibnu Sulaymaana bin Yasaarin oo aabihiis ka wariyay inuu Cumar bin Al Khadhdhaab dadka ugu khudhbeeyey tuulada la yiraahdo Al Jaabiyati (oo ah tuulu Dimishiq caasimadda Siiriya la xiriirta), markaasuu wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa Ilaahay dhexdeenna istaajiyay, si la mid ah sidaan anigu hadda idiin hor taaganahay oo kale, markaasuu wuxuu yiri: **"Akrimuu asxaabii, thumma allathiina yaluunahum, thumma allathiina yaluunahum. Thumma yath-haru al kathibu, xattaa inna al rajula la yaxlifu wa laa yustax1afu, wa yash-hadu wa laa yustash-hadu. Alaa faman sarrahu baxbaxatu Al jannata falyalzam al jamaacata: fa inna al sh-shaydhaana maca al fath-thi, wa huwa mina al ithnayni abcadu. Wa laa yakhluwanna rajulun bi imra'atin, fa inna al sh-shaydhaana thaalithuhum. Wa man sarrathu xasanatuhu wa saa'athu sayy'iatuhu fahuwa mu'minun".** Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "Asxaabteyda karaameeya (sharfa oo u roonaada), dabadoodna kuwa ayaga ku xiga karaameeya, dabadoodna kuwa ayaga ku xiga karaameeya. Markaas kaddib (saddexdaas fac kaddib) waxaa soo if baxaysa beenta, ilaa heer uu ninku iska dhaarto, aanna la dhaarsanayn, uuna markhaati kacayo ayadoo aan la markhaati furid gashan. War hoy! Kiinna jecel in la siiyo barta Jannada ugu fiican jamaacada (waa badnida) ha laazimo, maxaa yeelay shaydhaanku wuxuu la jiraa midka keligiis ah (oo jamaacada ka leexda), isaguna (waa shaydhaankee) labad wada jirta waa ka fogyahay. War hoy! nini yuusan haweeney qol kula keliyeysan (waa mid uu guursan karo aanse u dhixin) maxaa yeelaan shaydhaan ayaa saddexeeya (oo waxa foosha xun u qurxinaya). Qofka markuu camal suuban falo dabadeed ku farxa, markuu wax xun suubiyana ka xumaada, qofkaasi waa mu'min". Xadiithka waxaa weriyey Al Sh-shaaficii, Axmad, Al Tarmathii, Al Xaakim, iyo kuwo kaleba, waana Xadiith Saxiix ah. Ninkii wuxuu yiri: "Muxuu yahay macnaha amarka Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee ah in jamaacada la laazimo?" Al Sh-shaaficii wuxuu yiri: "Ma uusan laha macne mid ah mooyee". Wuxuu yiri: "Sidee buusan ku ixtimaaleyn hal macne mooyee?" Waxaan yiri: "Ayadoo ay jamaacada Muslimiintu ku kala firirsan yihiin dalalka kala duwan, qofna uma suurtowdo inuu laazimo jamaacada jirar kala firirsan, ayadoo isla markaas ay dalkiiba ku sugan yihiin jirar muslimiinta iyo kuwa gaalada iyo kuwa Muttaqiinta ah iyo kuwa fujjaarta ah. Marka, sidaas ayayan la jiridda jirarku macne u lahayn, maxaa yeelay suurto gal ma ayan aha. Isla markaasna isku imaadka jirarku waxba samayn kari mayo, oo sidaas ayayan laazimidda jamacadoodu wax macna ayan u lahayn, intaan ka ahayn laazimidda iyo u hoggaansamida waxay isku raacaan inay xalaal yihiin iyo waxay isku raacaan inay xaaraan yihiin. Sidaas ayaa qofka ku dhaqma waxay jamaacada muslimiintu ku dhaqmaan oo xalaasha iyo xaaraanta ah, qofkaasi wuu laazimay jamaacada muslimiinta. Qofka khilaafa waxay leedahay jamaacada muslimiintu, qofkaas jamaacadooda ayuu khilaafay, oo ah tii lagu amray inuu laazimo. Moogaantu waxay ka timaaddaa leexashada jamaacada laga leexdo oo firqo la noqdo, kuwaaso (Diinta qaarkeed mooggan oo aan aqoon), mana ay suurto gasho inay badanka muslimiiiitu oo ah jamaacadoodu guud ahaan warmoog yihiin, oo ay mooggan yihiin

macne ku sugan Kitaabka iyo Sunnada iyo Qiyaastaba, Inshaaa Allaahu". Waa kaas warka Al Sh-shaafici.

Raacidda muslimiintu waa waajib

Kitaabka Al Imaamu Al Shaaficii ee ah Axkaamu Al Quraani, uuna soo aruuriyay Al Imaamu Al Bayhaqii wuxuu juzka koowaad bogga laba iyo konton ku wariyay: "Abuu Cabdu Allaahi Al Xaafith wuxuu abuu Cabdu Allaahi Al Zubayr bin Cabdu Al Waaxid Al Xaafith Al Astarbaadii ka wariyay inuu yiri: waxaan maqlay abuu Saciid Muxammad bin Cuqayl al Faaryaabii oo leh: Al Muzanii iyo Al Rabiicu (waa labo ardo iyo saaxiib oo Imaam Al Shaaficii, oo math-habkiisa ka wariyay) waxay yiraahdeen: "Maalin annagoo la joogna Al Shaaficii ayaa waxaa u yimid oday, wuxuuna ku yiri: "Wax ma ku waydiin karaa?" Al Shaaficii wuxuu yiri: ”waydii”. Odagii wuxuu yiri: "Maxay tahay xujjada Diinta Ilaahay?" Markaasuu Al Shaaficii wuxuu yiri: "Waa Kitaabka Ilaahay". Odagii wuxuu yiri: "Maxaa kale?" Wuxuu yiri: "Sunnada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam". Odagii wuxuu yiri: "Maxaa kale?" Al Shaaficii wuxuu yiri: "Waxay Ummaddu isku waafaqdo". Odagii wuxuu yiri: "Xaggeebaad ka keentay inay waxay ummaddu isku waafaqdo ay Diinta xujjo u tahay (ay tahay in lagu dhaqmo)? Ma Kitaabka Ilaahay ayaad ka keentay oo aad ka tiri?" Markaasuu Al Shaaficii, Allaha u naxariistee, intuu aamusay saacad fakarayey. Markaasuu odaygu wuxuu yiri: "Waxaan ku siiyay saddex maalmood (si aad jawaab ii siisid)". Markaasuu midabka Al Shsaaficii is beddelay, markaasuu inta (masjidka ka) baxay uusan ayaamo gurigiisa ka soo bixin. Wuxuu yiri: markaasuu gurigiisa kasoo baxay maalintii saddexaad, markuu Masjidka yimidna durbadiiba waxaa u yimid odagii oo intuu salaamay fariistay, yirina: "Xaajadeydii meeday?" Markaasuu Al Shaaficii, Allaha u naxariistee, wuxuu yiri: "Acuuthu bi Allaahi mina. al sh-shaydhaani al rrajiimi, Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiirni: Ilaahay Cazza wa Jalla wuxuu yiri:
"Wa man yushaaqiqi Al Rrasuula min bacdi maa tabayyana lahu al hudaa, wa yattabic ghayra sabiili al mu'miniina, nuwallihi maa tawallaa, wa nuslihi Jahannama wa saa’at masiiran", oo ah Aayadda boqol iyo shan iyo toban ee Suuratu Al Nisaa'i oo macneheedu yahay: "Qofkii khilaafa Rasuulka kaddib markuu u cadaaday hanuunku, oo raca jidka muminiinta mid aan ahayn, waxaan wali uga dhigaynnaa wuxuu isagu wali ka dhigtay, waxaanna gelinaynnaa Jahannama, taasoo u xun meel loo ahaado." Ilaahayna Jahannama u gelin mayo qofka khilaafa jidka mu'miniinta inay raacidda jidkaasi farad tahay mooyee. (oo waxaa la isku cadaabaa marka wax waajib ah lala imaan waayo)". Markaasuu odagii wuxuu yiri: "Runta ayaad sheegtay", oo intuu sare kacay baxay. Al Shaaficii wuxuu yiri: "Waxaan akhriyay (waa saddexdaas maalmood oo uu jawaabta odayga ku maqnaa) habeen iyo maalin walba Quraan oo idil saddex goor, ilaa aan Aayaddaan dul istaagay". Intaas ayuu warka Al Shaaficii ku egyahay. Wuxuu kaloo Imaam Al Shaaficii Cabdu Allaahi bin Mascuud ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Naddara** (daadka dhibicda kor ku leh oo saadka ku xigah) **Allaahu cabdan samica maqaalatii fa xafathahaa wa wacaahaa wa addaahaa, fa rubba xaamili fiqhin ghayri faqiihin, wa rubba xaamili fiqhin ilaa man huwa afqahu minhu. Thalaathun laa yaghullu calayhinna qalbu muslimin: ikhlaasu al camali li Allaahi, wa al nnasiixatu lil muslimiina wa luzuumu jamaacatihim: fa inna dacwatahum tuxiidhu min waraa'ihim".** Xadiithka oo ay

kaloo wariyeen Al Bayhaqii iyo Axmad, Al Tarmathii, Abuu Daauud iyo kuwa kaleba, macnihiisu waxaa weeye: "Allaha wajigiisa nuuriyo oo uu qurxiyo, qadarkiisa wayneeyo addoon maqlay hadalkeyga aan iri markaas xifthiyay oo korka ka qabtay, kaddibna qalbiga ku weeleeyey, kaddibna bixiyey oo gudbiyey, waxaana dhici karta inuu mid fiqhi xambaarsan, oo hadalkiisu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam waa fiqhi iyo sharci, oo aan laftiisu faqiih ahayn, oo wuxuu sido aan aqoon, waxaana dhici karta mid fiqhi xambaarsan inuu u gudbiyo mid isaga uga garad badan. Saddex arrimoodna, ma uu necbaado mana uu khayaano qalbiga mu'minku: (**Kow**) Inuu camalkiisa Ilaahay khaalis iyo saafi uga yeelo, oo uusan axad kale camalkiisa u samayneyn, iyo (**Labo**) Inuu muslimiinta u naseexeeyo, iyo **(Saddex)** Inuu jamaacada muslimiinta laazimo, maxaa yeeley Alle barigooda ayaa xagga dambe ka hareereeyey, oo ducadooda ayaa khayaanada shaydhaanka. ka ilaalineysa, iyo inay baadiyoobaan."

Caadada muslimiinta

Culummada usuuliyiinta iyo fiqigiba ee Axnaafta iyo Maalikiyadaba arrinkaan nas loo hayn waxay nas ahaan u qaataan curfiga ama caadada muslimiinta, oo ay yiraahdeen waa asal usuusha fiqiga ka mid ah, waxayna xujjo ka dhigteen Xadiithka uu Cabdu Allaahi bin Mascuud wariyay, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri: **"Maa ra'aahu al muslimuuna xasanan fahuwa cinda Allaahi xasanun** ", oo macnihiisu yahay: "Waxay muslimiintu u arkaan inuu suuban yahay, waxaasi Ilaahay agtiisa waa wax suuban", siduu Muxammad abuu Zahrah kitaabkiisa Usuulu Al Fiqhi ugu wariyay, bogga laba boqol iyo saddex iyo toddobaatan. Waxaa wariyay Imaam Axmad. Sidoo kale waxaa qaacidadaas wariyay Al Sayuudhii, kuna wariyay kitaabkiisa Al Ashbaahu wa Al Nathaa'iru bogga sagaal iyo sideetan. Abuu Zahrah wuxuu kaloo wariyay inuu Shamsu Al A'immah Abuu Bakar Muxammad bin Abii Sahl Axmad Al Sarkhasii oo culummada waaweyn ee mathhanka Abuu Xaniifah, dhintayna sanadka Hijriga ah ee afar boqol iyo laba iyo sideetan, una dhiganatah kun iyo sagaal iyo sideetan ee miilaadiga uu kitaabkiisa fiqiga abuu Xaniifah ee Al Mabsuudh ku yiri: "Waxa curfiga ku sugnaada wuxuu la mid yahay waxa nas ku sugnaaday", waana marka nas la waayo oo keli ah, curfigaasna uusan Kitaab iyo Sunno khilaafsanayn.